Helping Hand™ *Health Education for Patients and Families*

# Tilmaamaha Qaadida Baaritaanka Cadadka Cusbada Kujirta Dhididka

## Sweat Chloride Test Collection Guidelines (Somali)

Baaritaanka Cadadka cusbada kujirta dhididka waxaa lagu ogaadaa heerka kolooriinka, cadadka cusbada, kujirta dhididka. Cusbada badan ee ku jiro dhididka waa hal aastaan oo muujinaysa qaar ka mid cudurada. Waxay la micno noqon kartaa in jirku uusan awoodin inuu dheelitiro cadadka biyaha ee uu u baahan yahay si uu u shaqeeyo.

Baaritaanku wuxuu qaadanayaa wax ka yar 2 saacadood. Laguma duraayo cirbad cunugaaga. Baaritaanku xanuun ma leh.

### Sida loo diyaariyo baaritaanka

- Haddii canugaaga yahay ilmo wayn, u sharax sida loo sameeyo baaritaanka.
- Si cunugaaga cabitaano badan oo aan lahayn maadada kafeega maalinta ka horeysa iyo subaxda baaritaanka. Cunugaagu waa inuu cabo biyo badan.
- Maqaarkiisa ha marin wax kareemo ah ama looshin ah muddo dhan 24 saacadood kahor xiliga baaritaanka.
- Usoo qaad funaanada dhaxanta, jaakad ama buste culus si aad oga caawiso inuu dareemo huur una dhidido inta baaritaanku socdo.
- Samee wax musquulinaaya inta baaritaanku socdo, sida buugaagta, boonbilaayaasha ama waxyaabaha lagu ciyaaro.
- Badal xafaayada canugaaga kahor xiliga baaritaanka, haddii loo baahan yahay, si uu u qalalnaado.


©1983, Waxaa dib loo eegay 2021, Nationwide Children's Hospital
Sii Socda…

## Sida baaritaanka loo sameeyo

1. Farsamo yaqaanka sheybaarka ayaa nadiifin doona gacanta iyo lugta cunugaaga gaar ahaan aaga baaritaanka lagu sameynaayo kadibna wuxuu ku qadan doonaa 2 fiilo oo koronto leh. Fiilo kasta gudaheeda waxaa kujira cajalad uu kujiro jeel. Jeelku wuxuu leeyahay kiimiko maqaarka ka caawinaysa inuu dhidido.
2. Fiilooyinka korontada waxay ku xiran yihiin mashiin. Mashiinku wuxuu cadad yar oo koronto ah (dareen koronto) ku sii deynayaa fiilooyinka korontada iyo jeelka muddo dhan 5 daqiiqo. Korontadaas waxay jirka ka dhalisaa dhidid. Waxaa laga yabaaa in cunugaaga goobta baaritaanka lagu sameynaayo ka dareemo huur ama cuncun laakiin ma uu dareemi doono shooc koronto.
3. Markaas kadib waxaa meesha laga saaraa fiilooyinka korontada. Gacanta ama lugta waxaa laga nadiifiyaa jeelka.
4. Farsamo yaqaanka sheybaarka ayaa saxan saafi ah, oo aruuriya muunada lehna tuubooyin ku dhejin doonaa korka meesha lagu xiray fiilooyinka korontada. Waxay meeshaas ku dhegaan doontaa muddo dhan 30 daqiiqo illaa laga aruurinaayo dhidid baaritaanka ku filan.
5. Tallaabooyinka 1 aad illaa 4 aad ayaa lagu sameynayaa markale gacanta ama lugta kale.
6. Saxanka muunada aruuriya ee labaad marka lagu xiro goobta, adiga iyo canugaaga waxaad aadaysaan qolka sugitaanka. Fadlan cunugaaga ku hay meel qalalan oo kulul guud ahaan inta baaritaanku socdo. Si degan ayuu meelaha u marmari karaa laakiin waa inuu iska ilaaliyo hawlaha jilcan kara saxanka ku xiran.
7. **Haka tagin qolka sugitaanka**. Haddii canuga uusan halkaas joogin marka saxanka muunada aruurinaaya la rabo in laga furo, baaritaanku wuxuu u baahnaanayaa in dib loo sameeyo.
8. Tuubada kujiran saxanka muunada aruurinaaya midabkiisa ayaa isbadelaaya marka uu buuxsamo. Mid kasta waxaa laga soo saarayaa saxankiisa kadibna dhididka waxaa lagu shubi doonaa tuubo baaritaan oo gaar ah si sheybaarka loo eego. Markaas kadib saxanka muunada aruuriya ayaa laga furi doonaa cunugaaga.

## Digniin

Mararka qaar, ilmaha wuxuu falcelin xasaasiyad ka qaadi karaa jeelka wuxuuna yeelan karaa calaamad cassaan ah ama boogo kasoo baxa meesha muunada laga qaaday. Astaamahaan way iska baaba'ayaan dhowr saacadood kadib. Waxaa jira suurtagalnimo dhif iyo naadir ah oo sababi karta in fiilooyinka korontada ay gubaan maqaarka ilmaha. Haddii calaamadaha cassaanka ah ama boogaha ah aysan baabi'in muddo dhowr saacadood ah ama haddii maqaarka cunugaagu muujiyo gubasho, u sheeg dakhtarka cunugaaga.

## Baaritaanka kadib

- Tuubooyinka wata dhididka waxaa loo diraa sheybaarka. Natiijooyinka baaritaanka waxaa loo diri doonaa dakhtarka cunugaaga.
- Haddii aad qabto wax su'aalo ah, hubi inaad waydiiso dhakhtarka cunugaaga.

Si aad u qabsato balan ama aad tilmaamo oga hesho Xarunta Adeega Sheybaarka ee kuu dhow, fadlan wac **Xarunta Adeegyada Sheybaarka oo aad ka wici karto (800) 934-6575** ama booqo NationwideChildrens.org/Lab.